

REPUBLIC OF



SOMALILAND

The President

JSL/M/DEC/222-022/22000
REF: _____

DATE: 28 February 2000

DECREETO MADAXWEYNE NO:22/2000

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Markuu arkay: Qodobka 82aad ee Dastuurka dalka Jamhuuriyadda Somaliland.

Markuu arkay: Soo jeedintii Wasiirka Wasaaradda Boosaha & Isgaadhsiinta ee xeerka tacriifada boosaha iyo isgaadhsiinta.

Marku tixgeliyey: Ogolaanshaha Golaha Wasiirada fadhi No: 44 ee 8 June 1998.

Markuu helay: Go'aanka Lr/GW/KF-9/114/99 ee 22/11/99 ee uu Golaha Wakiiladu ku ansixiyey xeerka tacriifadda Boosaha iyo Isgaadhsiinta.

Wuxuu



Soo saarayaa Dekreeto lagu baahinayo dhaqangalka xeerka No: 011/99 ee 22/11/99 ee tacriifada Wasaarada Boosaha iyo Isgaadhsiinta Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

A handwritten signature in black ink, appearing to read "Maxamed Ibrahim Cigaal".

Maxamed Ibrahim Cigaal
Madaxweyne



Juriyada Somaliland

AHA WAKILADA

Xarunta, Hargeysa



Republic of Somaliland

HOUSE OF REPRESENTATIVES

HQ, Hargeisa

Our ref: GW/KF-9/ + 114 - /99

Date: 22-11-99ka.

UJ/- GO^G AAN ANSIXIN TACRIIFADA BOOSAHA & ISGAADHSIINTA

GOLAHA WAKILADDA JSL

MARKUU ARKAY - Qodobada 18aad iyo 79 (I) ee Dastuurka qaranka jsl.

MARKUU ARKAY - Tacriifada Boosaha iyo Isgaadhsiinta ee Golaha Was-iiradu soo diyaariyeen.

MARKUU DHAGAYSTAY- Tallooyinka guddiga dhagaalaha ee Goluhu ka soo jeediyeen tacriifada.

MARKUU KA DOODAY- kana baaraandegay qaybaha tacriifadu ka kooban tahay.

MARKUU U CODEEYEEY- Qodobada cusub ee ka soo dhex baxay doda iyo soo jeedinta guddiga oo ay ~~barbar~~ taalo soo jeedintii Golaha Wasiiradu, fadhiigisii 22-11-99 oo ay goob-joog ahaayeen 49 Mudane.

Wuxuu ku ansixiyay cod aglabiyad ah (30-cod) oo ganan taag ah tacriifada Boosaha iyo isgaadhsiinta Jsl, iye qodobada loo cuskanayo dhaqangalinta tacriifada (eeg lifaaqa) halka 12 Mudane ka diideen 6 mudane oo kalena ka aamuseen, Guddoomiyuhuna aamu cod bixin sidda caadada ah. -

Allaa Mahad Leh

(Maxamed Xuseen Cismaan)
-XOGHAYAHA GUUD EE GOLAHA WAKILADA-



(Axmed Maxamed Aadan)

-GUDDOOMIYAH AHA GOLAHA WAKILADA JSL-

TACRIIFADA BOOSAHA IYO ISGAADHSIINTA

1. Isgaadhsiinta wasaarada & shirkadaha isku-xidhka

- | | |
|---|----------------|
| ➤ Khidmada Radio – Telefoonka Wasaarada/koolkii | slsh 4,000/= |
| ➤ Khidmada Telefoon-galinta Was/da | slsh 300,000/= |
| ➤ Khidmada adeega Tel. Gudaha wasaarada bishii | slsh 30,000/= |
| ➤ Khidmada isku xidhka telefoonada bishii/khadkii | slsh 8,000/= |
| ➤ Qiimaha madaxa telefoonka Was/da | slsh 100,000/= |
| ➤ Qiimaha waayirka telefoonka Was/mitirkii | slsh 2,000/= |
| ➤ Qiimaha furaha sanduuqa boosta | slsh 10,000/= |

2. Cashuurta Diwaan gelinta & rukhsadaha isgaadhsiinta

- | | |
|---|------------------|
| ➤ Diiwaangalinta shirkadaha isgaadhsiinta gaarka ah | slsh 2,000,000/= |
| ➤ Ruqsadaha | slsh 400,000/= |
| ➤ Diiwaangalinta shenteraalka PPX | slsh 100,000/= |
| ➤ Ruqsadaha shantaraalka PPX sanadkii | slsh 50,000/= |
| ➤ Diiwaangalinta DHL | slsh 1,500,000/= |
| ➤ Diiwaangalinta boosta degdega ah ee kale | slsh 1,000,000/= |
| ➤ Diiwaangalinta radiyow-telefoonka dadweynaha | slsh 100,000/= |
| ➤ Ruqsada radio-telefoonka D/naha sanadkii | slsh 50,000/= |

3. Cashuurta dakhliga isgaadhsiinta shirkadaha

- | | |
|---|----------|
| ➤ Dakhliga telefoonada dibada ee shirkadaha daqiqadii | 20% |
| ➤ Khidmada adeega mobileka gudaha daqiqadii | 3% |
| ➤ Telefoon galinta shirkadaha khadkii | 4% |
| ➤ Galinta kaybilka wasaarada khadkii | 15% |
| ➤ Adeega Radio-telefoonka dadweynaha bishii | 30,000/= |
| ➤ Kirada madaxa telefoonka shirkadaha, khadkii | 10% |

4. Kirada hantida Wasaarada (dawlada)

- | | |
|---|----------------|
| ➤ Kirada Micro wave, buuraha antenihii bishii | slsh 100,000/= |
| ➤ Kirada aqalada wasaarada qolkii/bishii | slsh 300,000/= |

- | | |
|--|----------------|
| ➤ Kirada hamaha wasaarada hanta/bishii | slsh 200,000/= |
| ➤ Kirada sanaadiiqda boosaha, sanadkii | slsh 25,000/= |

Qodobada Go'aanka

1. Waa in wasaarada boosaha iyo isgaadhsiintu golaha usoo gudbiso sharciga iyo barnaamijka isgaadhsiinta dalka JSL.
2. Waa in wasaaradu si degdeg ah u hawl galiso shirkadaha isku xidhka telefoonada taas oo baahi weyn loo qabo.
3. Waa in shirkadaha isgaadhsiinta gaarka ahi bixiyaan cashuuraha baaqday ee lagu leeyahay, sida cashuurta macaash macaashka gadidda diwaangalinta, ruqsadaha IWM, iyo tan dawladaha hoose ee waafaqsan sharciga ganacsiga dalka.
4. Waa in shirkadaha isgaadhsiinta ee gaarka ahi bixiyaan (lacag la'aan) isgaadhsiinta xarumaha adeega bulshada ee lagama maarmaanka ah sida saldhigya booliiska cusbitaalada, rugaha dab-damiska rugaha taraafiiga IWM.
5. Waa in wasaaradu ayaan bixin rukhsad isgaadhsiineed oo cusub inta ay golaha ka horkeenayso barnaamijka (policy) isgaadhsiineed ee ay ku hawl galayso.
6. Waa in dhamaan cashuuraha ku tilmaaman tacriifadan lagu qabto juwanka cashuur qabashada guud (general Receipt) oo ka diwaan gashan hantidhawrka si lacagtaasi ugu xerooto khasnada dawlada.

Allaa Mahad Leh

Maxamed Xuseen Cismaan

Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada

Axmed Maxamed Aadan

Gudoomiyaha Golaha Wakiilada

JAMHUURIYADA SOMALILAND

WASAARADA BOOSAHA & ISGAADHSIINTA

REF:

Date: 23/03/2000

Hargeisa

| | |
|--|----------|
| KU: Dhamaan Shirkadaha isgaadhsiinta Gaarka ah | Hargeisa |
| KU: Dhamaan Radio Fooneyayaasha | Hargeisa |
| KU: Gudiga Farsamada, Ag/Guud ee W.B.I, Ag/guud ee W/Maaliyada, Xisaabiyaha Guud ee JSL | |
| Ag/Maamulka & Lacagt ee W.B.I | |
| OG: Wasiirka Wasaarada Maaliyada | Hargeisa |
| OG: Madaxweynaha JSL | Hargeisa |

UJ: **Soo Gudbin Sharcigii Tacriifada Boosaha & Isgaadhsiinta oo Faahfaahsan**

Anigoo tixraacaya sharcigii tacriifada ee sumadeedu ahaa GW/KF-9/114/99, eek u taariikhaysan **22/11/99**, kuna saabsanayd Tacriifada Boosaha & Isgaadhsiinta, sharciga xeerkiiisa **Lam 011/99 & digreeto** madaxweynaha **Lam 22/2000**. Shirkeenii ugu dambeeyey ee ka dhacay xarunta wasaarada **22/03/2000** ee aan idiinku soo gudbinay sharcigii tacriifada ee ay soo ansixiyeen golayaashu wuxuu ka koobnaa (5) qaybood.

1. Qaybta koowaad waxaa iska leh wasaarada hadii ay si wanaagsan u shaqayso.
2. Qaybta labaad waxaa iska leh huteelada marka ay rakibaan shantaraalka PPX.
3. Qaybta sadexaad waxaa iska leh Radio Telefoonka fooneyayaasha dadweynaha.
4. Qaybta afraadna waxaa iska **DHL**ka waraaqaha & Boostada degdega ah.
5. Qaybta shanaad waxaa iska leh shirkadaha isgaadhsiinta gaarka ah oo ka kooban dakhliga telefoonka dibada daqiiqadiiba &mobile telefoonka gudaha daqiiqadiiba, iyo telefoonka gudaha & galinta telefoonka gudaha ruqsada & kirooyinka ku baqday sanadihii tagay.

Sharciga tacriifadu faahfaahinteedu waa sidan.

1. Qaybta koowaad ee Wasaarada

- | | |
|--|--------------|
| ➤ Khidmada Radio Telefoonka Wasaarada Koolkii | slsh 4,000 |
| ➤ Khidmada telefoon galinta wasaarada | slsh 300,000 |
| ➤ Khidmada adeega telefoonada wasaarada bishii | slsh 30,000 |
| ➤ Khidmada isku xidhka telefoonka bishii | slsh 8,000 |
| ➤ Qiimaha madaxa telefoonka wasaarada | slsh 100,000 |
| ➤ Qiimaha waayirka telefoonka wasaarada | slsh 2,000 |
| ➤ Qiimaha furaha sanduuqa boosta | slsh 100,000 |
| ➤ Kirada sanduuqii boosta sanadkii | slsh 25,000 |

2. Qaybta Labaad Huteelada

- | | |
|---|--------------|
| ➤ Diiwaan gelinta shantaraalka PPX Halmar | slsh 100,000 |
| ➤ Ruqsada shantaraalka PPX sanadkii | slsh 50,000 |

3. Qaybta sadexaad Radio Telefoonka Fooneyayaasha Dadweynaha

- | | |
|--|--------------|
| ➤ Diiwaan galinta radio telefoonka dadweynaha halkii mar | slsh 100,000 |
| ➤ Ruqsada radio telefoonka dadweynaha sanadkii | slsh 50,000 |
| ➤ Adeega radio telefoonka dadweynaha bishii | slsh 30,000 |

4. Qaybta Afaraad DHLka waraaqaha & Boostada degdega ah

- | | |
|--|----------------|
| ➤ Diwaan galinta DHLka waraaqaha hal mar | slsh 1,500,000 |
| ➤ Diwaan galinta boostada degdega ah hal mar | slsh 1,000,000 |

5. Qaybta Shanaad Shirkadaha Isgaadhsiinta

| | |
|--|----------------|
| ➤ Diwaangalinta shirkadaha isgaadhsinta gaarka ah halmar | slsh 2,000,000 |
| ➤ Ruqsada shirkada isgaadhsinta gaarka ah sanadkii | slsh 400,000 |
| ➤ Dekhliga telefoonka dibada shirkadaha daqiqadiiba | \$0.20% |
| ➤ Khidmada adeega mobile gudaha daqiqadii | \$3% |
| ➤ Telefoon gelinta shirkadaha khadkii | \$4% |
| ➤ Gelinta cabelka wasaarada khadkii | \$15% |
| ➤ Kirada telefoonka gudaha khadba bishii | \$10% |
| ➤ Kirada Micro Waveka Buuraha Bishii | slsh 100,000 |
| ➤ Kirada aqalada wasaarada Qol/bishii | slsh 300,000 |
| ➤ Kirada haamaha Wasaarada Haanti/bishii | shsl 200,000 |

2) Qaabka shirkaduhu ku soo xaraynayaan dakhliyada kala duwan

- A. dakhli sanadeedka waxaa lagu bixin doonaa mudada u dhaxaysa (1) bisha koowaad ilaa bisha 3aad (31) keeda sanadkasta.
- B. Dakhli bileedka waxaa lagu bixin doonaa dhamaadka bilkasta
- C. Dakhliga telefoonada dibada iyo dakhilga mobile telefoonka waxay wasaaradu iyo shirkaduhuba ku xisaabtami doonaan saddex biloodkiiba hal mar iyadoo lagu salayn doono xisaab xidh bileedka ee shirkadaha ilaa inta uu ka dhaqan galayo barnaamijka isku xidhka telefoonada shirkadaha.

Dhamaan dakhliyada boosaha iyo isgaadhsinta waxaa la waafajin doonaa nidaamka sharciga xisaabaadka Qaranka.

Mudada kor ku xisan xidii ku bixin wayda waxaa raaco doona ganaa u dhigma 1/3 dakhliga waajibay ee dub u dhacay. Fulinta iyo la socodka xisaabaadkaas waxaa u xilsaaran gudiga farsamada eek ala ah Agaasimaha Guud ee Wasaarada Boosaha iyo isgaadhsinta, Agaasimaha Guud ee Wasaarada maaliyada, Xisaabiyaha Guud ee JSL iyo agaasimaha Maamulka iyo Lacagta ee Wasaarada Boosaha iyo Isgaadhsinta.

Ugu dambayntii waxaan idinku boorinayaa cid walba wixii ka khuseeya sharciga tacriifada kor aynu ku soo xusnay inay sidiisii ugu dhaqanto.

Alaa mahad Leh

Jaamac Gaas Mucaawiye

Wasiirka Wasaarada Boosaha & Isgaadhsiinta